



STAY SAFE MN

DAAWOYINKA COVID-19

Evusheld

Evusheld waa daawaynta jeermis la deriska asaliga ah ee loo adeegsado u-baylah noqoshada kahortagga ah (PrEP) ee ka dhanka ah KOFID-19. Evusheld waxay ka hortagi kartaa COVID-19 inuu ku dhaco dadka jira 12 sanno iyo ka weyn ee qaba xaaladaha sababa daciifnimada dhexdhexaadka ilaa daran ee habdhiska difaaca jirkooda.

Habdhiska difaaca jirka ee qofka waa waxa la dagaallamo cudurka, iyadoo la isticmaalayo jeermis la derisyada cudurku sameeyo. Jeermis la derisyada waa borootiino khaas ah. Jeermis la derisyada asaliga ah waxay isku mid ayay u shaqeeyaan balse waxaa lagu sameeyaa shaybaarka.

Daawada jeermis la deriska asaliga ah waa la isku duraa si gacan looga kahortagga KOFID-19 inuu ku dhaco dadka jirkooda ay dhibaato ka haysato inuu sameeyo jeermis la derisyada. Waxaa la isticmaalaa kahor inta uusan qofku jirran, ma ahan kadib.

Waxaa laga yaabaa inaad daawadan heli karto haddii:

- Habdhiska difaaca jirkaagu daciifay iyadoo ugu wacan xaalad caafimaad ama maadaama aad qaadnayso daawooyin ka dhiga mid daciif ah oo aan lagaa filaynin inaad yeelato falcelin difaaca jirka ah markaad qaadato tallaalka KOFID-19.

AMA

- Aad leedahay taariikh falcelin aad u xun inaad ka qaado tallaalka KOFID-19 iyo/ama walax ku jirta tallaalka COVID-19, sababtaas awgeedna, aan lagula talin inaad qaadato tallaalka KOFID-19.

IYO

- Aad hadda qabin fayraska keena KOFID-19.
- Aad dhawaan xiriir dhow la yeelan qof qaba KOFID-19 (u-baylah noqosho).

Dadka intooda badan, tallaalka ayaa lagula taliyaa inuu yahay habka ugu fiican ee naftooda uga ilaalin karaan KOFID-19. Evusheld uma ahan beddel is tallaalka dadka lagula taliyay inay qaataan tallaalka KOFID-19. Waa inaad sugtaa ugu yaraan laba toddobaad inta u dhaxaysa si aad u hesho tallaalka KOFID-19 iyo u Evusheld.

Badi daawooyinka cudurka Kofid-19 waa bilaash laakiin waxaa jiri kara kharsh iyo khidmada kale. Haddii aad leedahay caymis caafimaad, lawadaag macluumaadkaas bahda caafimaadka markaad is daaweenayso. Haddii aadan laheyn caymis caafimaad, waydii bixiyaha adeega caafimaadka ama farmashiistaha qiimaha.

Booqo [halkaan si aad u hesho macluumaad ku saabsan Daaweynta KOFID-19 \(www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/meds.html\)](http://www.health.state.mn.us/diseases/coronavirus/meds.html), ama la hadal dhakhtarkaaga ama daryeel-bixiye caafimaad oo kale si aad u ogaato inaad isticmaali karto daawadaan iyo si aad u hesho rug caafimaad.

U sheeg daryeel-bixiyahaaga caafimaad haddii:

- Aad uur leedahay ama qoysnayso inaad uur qaado
- Aad naasnuujinayso
- Aad qaadnayso daawooyin
- Aad qabto tiro yar oo dhiig-xinjireeye ah ama cillad dhiig-bax
- Aad qabto xasaasiyad
- Aad qabto jirrio kasta oo daran, gaar ahaan dhibaatooyinka wadnaha, ama aad halis sare ugu jirto wadne qabad ama istarooq

Si aad u hesho macluumaad badan, waxaad ka wici kartaa Khadka Guud ee KOFID-19 lambarka 833-431-2053, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 7 galabnimo Isniinta ilaa Jimcaha, iyo laga bilaabo 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo Sabti kasta.

